



2007 Police Accountability Review Panel

PO Box 94745
Seattle, WA 98124-4745
(206) 684-0181

Judge Terrence A.
Carroll, ret., Chair

Bob Boruchowitz,
Vice Chair

Jenny A. Durkan

Lorena González

Pramila Jayapal

Gary Locke

Hubert G. Locke

Judith Krebs

Mike McKay

Norman B. Rice

Jennifer Shaw

Aug. 20, 2007

Waad Salaamantahy

Magacaygu waa Terrence Carroll, waxaan guddoomiye ka ahay Guddiga Ka-mas'uul-ahaanshaha iyo Naqtiinka ee Booliska ee 2007. Bishii June 29, 2007, ayuu Duqa Magaalada, Mayor Greg Nickels uu magacaabay guddi 11- xubnood ka kooban oo naqtiin ku samaynaya hannaanka ka-mas'uul- ahaanshaha oo soo saara talo-bixin lagu wanaajinayo. Waxaa la filayaa in aynu warbixintayada duqa u gudbino bisha Noofeember.

Hawsha naqtiinka ee aynu samaynayno waxaa ka mid ah in aynu helno aragtida dadweynaha ee la-xidhiidha hannaanka ka-mas'uul ahaanshaha booliska Seattle iyo sidoo kale waxa shakhsiyan lagala kulmay Xafiiska Ka-mas'uul-ahaanshaha ee Xirfadlayaasha. Waxaan kugu casuumayaa in aad ka soo qaybgashid shirkayaga la qaban doono 10-ka bisha Sebteembar ee aynu isku-waydaarsanayno waayo-aragtinimadeena. Wuxuu shirkaasi socon doonaa 6:30 Pm illaa 9:00 Pm, waxaana lagu qaban doonaa qolka " Bertha Knight Landes" ee ku yaalla Goobta shirarka ee magaalada, 600 Fourth Ave. Marka laga bilaabo 6:00 Pm ayaad saxeexaysaa in aad fikirkaaga dhiiban doontid. Maadaama aynu filayno ka-qaybgalayaal aad u badan, waxaa qof-welba oo fikirkiisa dhibanaya la siinayaa waqti aan kabadnayn saddex daqiiqo.

Haddii aanad shirkan kaqayb-geli karaynin, waxaad fikirkaaga oo qoraal ah aad noogu soo gudbin kartaa ciwaankayaga e-mail ka: pareviewpanel@seattle.gov ama boosta Maraykanka:

Bob Scales

2007 Police Accountability & Review Panel Support
2007 City of Seattle, Office of Policy & Management
(Magaalada Seattle Xafiiska Siyaasadda iyo Maaraynta)
P.O. Box (Sanduuqa Boosta) 94745
Seattle, WA 98124-4745

Tani waxay noqon doontaa fursad aad rayigaaga ku-saabsan hannaanka ka-mas'uul ahaanshaha ee booliska Seattle toos ugu soo gudbin karaysid guddiga hawsha loo xil-saaray. Guddigayagu waa mid dhinacyo badan wax ka eegaya, sidaa-darteed waxaanu rajaynaynaa in aynu maqli doono fikrado kala-duwan oo ka soo yeedhi doona xubno kala-duwan oo bulshada ka tirsan. Fikradahaasi kala-duwan ee aynu helayno qiimo weynbay u leeyihiin naqtiinka aynu samaynayno.

Haddii aad doonaysid in aad shiraka ka-qaybqaadatid, turjumaana doonaysid fadlan kala-soo-xidhiidh Julie Johnson taleefonka 206.684.0181, waxaanad la-xidhiidhaa illaa 30-ka August, si aad adeegga u heshid Jaanalka Seattle ayaa geeddi-socodka shirkaa duubi doona, waxaanad muqaalka (fiidiyoowga) ka daawan kartaa khadkayaga website-ka oo ah:

www.seattle.gov/policeaccountabilityreviewpanel/

Guddigayagu wuxuu baadhi doonaa qaab-dhismeedka iyo geeddi-socodyada hannaanka ka- mas'uul ahaanshaha booliska Seattle. Kaddibna waxaannu soo-saari doonaa warbixin muujinaysa waxyaalaha aynu la kullannay iyo talooyinka la soo-jeediyay ee xaaladda lagu wanaajinayo. talooyinka la soo-jeediyay waxaa loo-gudbin doonaa duqa magaalada si ay saldhig ugu- naqdaan tallaabooyinka lagu xaqiijinayo in ay magaalada Seattle ka-jiraan geeddi-socdyo, cadcaddaani, ka-mas'uul-ahaansho iyo waxtarba leh.

Booliska wuxuu la-socdaa (orka ka ilaaliyaa) saddex arrimood oo magaalada Seattle ah; mas'uuliyadda kor kala-socoshada baadhitaanka waxaa iska-leh Xafiiska Ka-mas'uul- ahaanshaha khibradeed (OPA). Hadafka OPA-du wuxuu yahay in uu qaabilo, baadhitaana ku-sameeyo dhaqan-xumada booliska ee ay muwaaddiniintu soo-gudbinayaan. Xafiiska Hanti- dhawrka Ka-mas'uulahaanshaha Khibradeed iyo Xafiiska Golaha Naqtiinka ee Ka-mas'uul- ahaanshaha Khibradeed.

Xafiiska ka-mas'uul-ahaansha Khibradeed waxaa la aasaasay bishii Nofeembar 1999, taas oo ahayd mid lagaga jawaabayay talooyin uu soo-jeediyay guddiga uu magacaabay Paul Schell oo waqtigaas ahaa duqa magaalada, waxayna ujeeddadu ahayd in la qiimeeyo arrinta la-xidhiidha ka-mas'uul ahaanshaha shaqaalaha ka-shaqeeya Waaxda Booliska ee Seattle, iyo weliba geeddi socodka la isticmaalayo si loo-baadho warbixinada ku-saabsan anshax-xumada booliska.

Sanadkii 1999, kaddib markii muddo saddex bilood ahayd baadhitaan la-sameeyay ayuu goluhu soo-saaray warbixintiisi ugu-dambaysay. Inkasta oo ayna jirin caddaymo la helay oo muujinaya in musuq maasuq balaadhan ama anshax-xumo ay dhacday, haddana warbixinta guddigu waxay soo-saartay talooyin taxan oo lagu kordhinayo kalsoonida waaxda lagu qabo iyo in la sii wado karti iyo isku-duubnaan xirfadeed oo heerka la rabo gaadhsiisan.

Warbixinta guddiga waxaa udub-dhexaad u ahayd abuuridda Xafiiska Ka-mas'uul-ahaansaha Khibradeed. Agaasimihii ugu horeeyay ee OPA wuxuu ahaa Sam Pailca, waxaana magacaabay duqa magaalada, waxaana 2000 ansixiyay golaha. Sida uu dhigayo sharciga magaaladu, xadka agaasimayaasha OPA waxay ugu badnaan adeegayaan waqti dhan lix sano. Agaasimaha waqtigan xaadirka oo ah Kathryn Olson waxaa magacaabay duqa magaalada, waxaana 2000 ansixiyay golaha.

Duqa magaaladu waxaa kale oo uu magacaabay Hanti dhawraha (Auditor) Xafiiska ka-mas'uul-ahaanshaha Khabirada, kaas oo ah qandaraasle madax-bannaan oo si furfuran baadhitaan ugu samayn doona faylasha baadhitaanka gudaha oo soo-jeedinaya talo-bixin ku-saabsan baadhitaanada. Xafiiska Golaha Naqtiinka ee Ka-mas'uul-ahaanshaha Khibradeed, oo ka-kooban saddex xubnood oo waddaniyiin ah oo uu dhisay oo uu magacaabay Golaha Magaaladu, wuxuu samayn doonaa baahitaanno xidhan oo lagu go'aaminayo habka ay OPA-du ay hawshaa u farsamaysay. Kooxdu waxay warbixinteeda u soo gudbinaysaa Golaha Magaalada.

Waxaan rajaynayaa in aad nagala-soo-qaybgeli doontid shirkan muhiimka ah, laakiin haddii aanad karaynin in aad shirkan ka soo-qaybgashid, waxaannu kugu dhiiri-gelinaynaa in aad fikradahaaga noogu soo qortid. Dhammaan fikradaha la soo-jeedinayo waxay geli doonaan galka dadweynaha.

Si daacadnimo leh,
Garsoore Terrence A. Carroll, ret., Guddoomiye
Guddiga Naqtiinka Ka-mas'uul-ahaanshaha Booliska 2007.